

## Adeegyada cilmu-nafsiyaqaanka ee adeegyada shaqo galinta Helsinki

Cilmu-nafsiyaqaannada u kuurgalay su'aalaha la xiriira doorashada xirfadda iyo qorshaha xirfadda shaqada ayaad taageero iyo hagitaan uga heleysaa xaaladaha doorashada iyo xallinta dhibaatooyinka la xiriira xirfadda shaqada iyo waxbarashada.

### Waxaad hagitaanka u doonan kartaa tusaale ahaan

- si aad caddaysato awoodahaada waxqabadka, ilo awoodeedyadaada, waxyaabaha aad xiiseysa ama rajooinkaada xirfadeed
- doorashada laanta waxbarashada
- dhibaatooyin nolosha shaqada ka jira dartood
- sababtoo ah ma xiisaynaysid xirfadda aad hadda ka shaqayso
- marka ay sababo caafimaad, xaalad nololeed ama cillado waxbarasho ay xadayanayaan doorashooyinkaada.

Hagitaanku wuxuu ku siinayaa fursad aad cilmu-nafsiyaqaanka si wadajir ah ugala fekerto xaaladdaada iyo waxyaabaha rajaynayo, waxaad sidoo kale heleysaa aragtiyo cusub. Hadafka hagitaanku waa in uu adiga kaa taageero kaana caawiyoo go'aannada mustaqbalkaada. Hagitaanka cilmu-nafsiyaqaanku waa adeeg lagu kalsoonaan karo oo lacag la'aan kuu ah. Hagitaanka waxaa lagu helaa luqadaha kala ah finnish, iswiidhish, ingiriis iyo weliba iyadoo turjubaan la isticmaalayo. Waa macaamiisha ugu adeegnaa si fool-ka-fool ah, khadka telefoonka iyo xiriirkha khadka fiidiyowga.

Waxaad hagitaanka cilmu-nafsiyaqaanka ku heli kartaa adigoo la xiriira khabuurka arrimahaada qaabilsan ee adeegyada shaqa gelinta.

